

MAGAALADA HELSINKI

ARRIMAHAD BULSHADA IYO CAAFIMAADKA

Adeegyada gaarka ah ee qoysaska
Arrimaha sharciga ee qoyska

02.04.2020

ADEEGGA MACAAMIISHA DANO ILAALIYAH CARRUURTA EE XILLIGA SAFMARKA FAYRUSKA KORONA

Adeegyada macaamiisha ee xafiiska dano ilaaliyaha carruurta waxaa xilliga safmarka fayruska Korona loo kala qaybiyyad sida ay u kala muhiimsan yihiin. Adeegga macaamiishu ma xirna, laakiin danaha xafiiska laga qabsanayo ayaa loo qoondeeyay arrimaha la xiriira aabanimada iyo hooyanimada. Wuxaan beddelnay sida aan wax uga qabanno arrimaha heshiisyada wakhtigan gaarka ahna waxaan iyadoo aan xafiiska la imaaneyn qabanayaa kulamada macaamiisha ee horay loogu ballamay.

Wakhiyada **aabanimada** iyo **hooyanimada** ee degdegga ah si caafi ah ayaa xafiiska loogu qabanayaa. Dano ilaaliyaha carruurta ayaa haddii ay u suurtagasho la xiriiraya kulanka kahor macaamiisha aabanimada iyo hooyanimada. Waxaa la doonayaa in xiriirkas lagu xaqijiyo xaaladda caafimaadka macaamiisha ee markas jirta iyo u dagnaanshaha qaadista fayruska Korona kulanka kahor. Dano ilaaliyaha carruurta ayaa codsan kara macluumaad loogu baahan yahay caddeynya aabanimada ama hooyanimada, si dukumentiyada loogu sii diyaariyo kulanka. Haddii macaamilka ama xubin qoyskiisa ka tirsan uu qabo calaamadaha neef mireenka sare (hargab, duray, qufac iwm) qaabiliaad looma imaan karo xitaa arrimo la xiriira aabanimada iyo hooyanimada.

Haddii macaamilka loo qabtay ballanta dano ilaaliyaha carruurta ee **arrimaha heshiiska**, dano ilaaliyaha ayaa la xiriiraya macaamiilkii si uu ugula heshiyo sidii arrinta loogu xallin lahaa khadka internetka. Dano ilaaliyaha carruurtu wuxuu ugu horreyn la xiriiraya waalidka magaciisa ballanta lagu qabtay. Dano ilaaliyaha carruurtu xaaladda ayuu baarayaa kaddibna waalidka ayuu kala heshiinyaan sida arrinta loogu dhammayn karo khadka internetka. Haddii turjubaan loo ballamay kulanka, wuxuu dano ilaaliyuhu inta wakhtiga kulanka lagu jiro la xiriiraya labada waalid isagoo turjubaanka isticmaalaya. Waalidku waa in telefoonka lagu helaa inta lagu jiro wakhtiga iyaga loo qabtay. Kahor inta aan heshiiska la sameyn ayuu dano ilaaliyaha carruurtu si kala gaar ah ula hadlayaa labada waalid.

Waxaa wanaagsan in waalidiintu ay dhixdooda uga hadlaan, sida ay doonayaan in heshiiska loo sameeyo iyo in sidoo kale ay labadoodu ka heshiyyaan inta badan waxyaabaha uu heshiisku ka kooban yahay. Haddii ay doonayaan waxay waalidku taageero iyo caawimaad ka dhigan karaan qorshaha waalidnimada ee laga helo bogagga shabakadda THL iyagoo ku raadinaya erayga ah Qorshaha waalidnimada. Waxaa wanaagsan in waalidku ay sidoo kale bartaan fiidiyowgda kartoonka ah ee Qoyska is furan ee MLL (<https://helsinki.mll.fi/lapset-ensin-erossakin/videot/>).

Dano ilaaliyaha carruurtu wuxuu la xiriirayaan walaidka ballanta qabsaday kahor inta aan la gaarin wakhtiga ballanta. Haddii dano ilaaliyuhu uusan helin macaamiisha inta lagu jiro wakhtiga la ballamay, waxaa talo la weydiin karaa lambarta talabixinta (09 310 43447) ama emaylka lastenvalvoja.helsinki@hel.fi.

Haddii uu macaamilku doonayo in uu ballanta baajiyi, farriin qoraal ah ayuu uga ku sameyn karaa lambarkan 050 402 0084. Adeeg kale lambarkan laguma qabto. Ku soo sheeg farriinta magacaaga, wakhtiga ballanta oo sax ah iyo magaca dano ilaaliyaha carruurta ee ballanta lagaaga qabtay. Baajintu waxay quseysa labada waalid, sidaas darteed ballanta la baajiyay waa in waalidka kalana la ogeysiyyaa.

Talabixinta dano ilaaliyayaasha carruurtu lambarkan 09 3104 3447 ayey sidan soo socota ugu shaqeeyaan:

Isnin-Jimco saacadda 9.00-11.00

Arbaco saacadda 15.30-17.30

Talaado iyo Khamiis saacadda 12.00-13.00

Salaan saaxiibtinimo,

Cinwaanka booqashada Vironkatu 2 00170 Helsinki	Cinwaanka boostada Laanta sooshalka iyo caafimaadka ee Helsinki Arrimaha sharciga ee qoyska SB 8620 00099 MAGAALADA HELSINKI	Telefoon (09) 310 5015/sii gudbin Fakis (09) 310 43065	Emaiil etunimi.sukunimi@hel.fi
---	---	---	--

**MAGAALADA HELSINKI
ARRIMAHAD BULSHADA IYO CAAFIMAADKA**

Adeegyada gaarka ah ee qoysaska
Arrimaha sharciga ee qoyska

02.04.2020

Dano ilaaliyaha carruurta Helsinki

Cinwaanka booqashada
Vironkatu 2
00170 Helsinki

Cinwaanka boostada
Laanta sooshalka iyo caafimaadka ee Helsinki
Arrimaha sharciga ee qoyska
SB 8620
00099 MAGAALADA HELSINKI

Telefoon
(09) 310 5015/sii gudbin

Fakis
(09) 310 43065

Emayl
etunimi.sukunimi@hel.fi